Somali

U-tilmaamidda Ardayda Dheefta Guriyeynta iyo Dheefta Cashuurta Kawnsalka

(A guide to Housing Benefit and Council Tax Benefit for Students)

Warqaddan-yare daabacani waxay sharax ka bixinaysaa Dheefta Guriyeynta iyo Cashuurta Kawnsalka ee ku saabsan ardayda. Qawaaniintu waa heer qaran, waana isku-mid meel kasta ood ku nooshahay. Haddii aanad garanayn ka uu yahay kawnsalka shaqada ku leh deegaanka aad ku nooshahay, waxad ka heli karaysaa biilka aad ku bixiso Cashuurta Kawnsalka.

Miyey aradaydu codsan karayaan Dheef Guriyeyn iyo Dheef Cashuur Kawnsal?

Nidaam-maamuleedka Dheefta Guriyeynta iyo Dheefta Cashuurta Kawnsalku wuxu I noo sheegayaa in uu ardaygu yahay qof kooras wax-barasho ku qaadanaya mu'asasad wax-barasho.

Waqti-buuxa ardayda wax-barata intooda badani ma codsan karayaan Dheef Guriyeyn waayo Dawladdu waxay ka filaysaa in ay isticmaalaan lacag kale sida deeqda la siiyo, deyn arday ama waxay awoodi karayaan maal-gelin ay kiradooda ku bixiyaan.

Guud ahaan, ujeedooyin Dheef Guriyeyn awgeed, arday waqti-buuxa waxa weeye midka qaadanaya kooras caga-cageynaya 16 saacadood ama in ka badan toddobaadkii oo ah wax-barasho la hagayo. Haddii aanad hubin in aad tahay arday waqti buuxa wax-barta ama mid qayb-waqti, waxad la xidhiidhaa oo kuu sheegi karaya kulliyad-daada ama Jaamicad-daada.

Waa kuwee aradayda codsan karaya Dheef Guriyeyn Iyo Dheef Cashuur Kawnsal?

Waxa aad codsan karaysaa:

- hadaad tahay arday qayb-waqti wax-barta;
- hadaad tahay arday ka mas'uul ah ilmo ama qof dhallin-yaro ah (adiga oo qayb ah laba ruux ama aad kelligaa tahay);
- hadaad tahay waalid koryie keliigii ah;
- hadaad tahay 60 jir ama ka weyn-tahay;
- hadaad qaadatid Taakulayn Dakhli ama dakhli ku salaysan Gunno Shaqo-raadis;
- hadaad buuxiso shuruudaha lacagta dul-saarka ee lagu qaato Awood-dari (Disability Premium) ama Awoodi-dari Aad Usii daran (Severe Disability Premium)
- hadaad shaqayn kari wayday 28 toddobaad;
- hadaad u-qalanto guuno arday itaal-daran sababta oo ah in aad dhega la'dahay;
- haddii ay da'daadu ka yartahay 21 jir oo aanad ku jirin wax-barasho sare;
- haddii aad leedahay rafiiq aan ahayn arday (waxa loo baahan-yahay in ay aygu codsadaan, mahaa adiga); ama
- haddii aad hakiso kooras-kaaga, adiga oo ogolaansho ka haysta kulliyadda ama jaamicadda, taasi uu kuugu wacan-yahay bukaan ama mas'uuliyadu daryeelid.

Haddii aanad hubin in aad xaq u-leedahay in aad codsan karayso, waxad had iyo jeer wixii talo-siin kala xidhiidhi karaysaa kawnsalka ku yaal deegaan-kaaga.

Ardayda kal-kaaliy-yaasha ahi miyey codsan karayaan Dheef Guriyeyn?

Ardayda ay Adeega Caafimaadka Qaranku maali-geliyaan way codsan karayaan Dheef Guriyeyn waxana lagu dabaqayaa qawiiniin la mid ah kuwa lagu dabaqo ardayda kale. Haddii aanad hubin, tilifooni kawnsalka ku yaal deegaan-kaaga si ay talo kaaga siiyaan.

Miyey ardayda debedda ka yimi codsan karayaan Dheef Guriyeyn?

Haddii aad tahay arday ka yimi Yurub, waxa keliya ood codsan karaysaa Dheef Guriyeyn haddii aad hoos timaado mid ka mid ah dabaqadaha ardayda codsan karayaa. Eeg qaybtan 'Waa kuwee ardayda codsan karaysa Dheef Guriyeyn iyo Dheef Cashuur Kawnsal?'

Haddii aad ka timid meel ka baxsan Yurub waxay u eegtahay in aanad codsan karayn wax Dheef Guriyeyn ah, xataa haddii aad ka mid tahay kooxaa ardayda dalban karaya. Waxay ku xidhan tahay shuruudaha aad ku timid wadanka oo waxanu u-baahan doonaa macluumaad ku saabsan xaalad-daada socdaalka ka hor inta aannaan la macaamilin codsi-gaaga Dheefta Guriyeynta.

Miyey ardayda guri ka kiraystay jaamicad ama kulliyad codsan karayaan Dheef Guriyeyn?

Haa, aradayda wax-barta waqti-buuxa ama qayb-waqti xaqana u lehi way dalban karayaan dheef guriyeyn ooy ku bixiyaan hooyga ay ka kiraysteen jaamicad ama kulliyad. Aradayda xaqa u leh ee ku nool guri ay ka kiraysteen jaamicadda ama kulliyad-dooda waxay weliba u qalmaan Dheef Guriyeyn oo ka baxsan muddada wax-barashada. Taasoo adeegsan karayo oo keliya haddii sababta uu ardaygu u degan-yahay guriga ay fudaydinayso joogitaan-kooda kooraska.

Waxa laga yaabaa in aad u qalantid haddii ay jaamicaddu ama kulliyadu si ku meel gaadh ah uga kiraystaan kawnsalka, ururu guriyeyn ama kireeye khaas ah, oo aad hoos emanayso mid ka mid ah dabaqadaha ardayda codsan karaya Dheef Guriyeyn.

Tilifooni kawnsalaka ku yaal deegaan-kaaga si aad wax dheeraad ah uga ogaato arintan.

Waxay tahay in aan labo hooy haysto – mid ku yaal kulliyadda iyo mid ku yaal beledka. Miyaan codsan karayaa Dheef Guriyeyn?

Dheefta Guriyeynta sida caadiga ah waxa lagu bixiyaa oo keliya hooyga aad ku nooshahay ee aad kirada ka bixiso. Waxa laga yaabaa in aad caawimo u hesho laba hooy hadaad tahay arday ama tababarte, laba ruux midkood ah, kuwaas ooy tahay in ay ku noolaadaan hooy kiro kala gooni ah sababtuna tahay kooras-kaaga ama shaqo.

Waxa laga yaabaa in aad codsan karayso Dheef Guriyeyn laakiin waxay ku xidhan tahay duruufa-haaga. Waxa weeye in aad ka hubiso kawnsalka ku yaal deegaan-kaaga sidaasi darteed la xidhiidh ayaga si ay talo kuu siiyaa.

Haddii aan ahay arday codsan karaya Dheef Guriyeyn, imisa ayaa laysiinayaa?

Inta lagu siinayaa way kala duwan-tahay, waxayna ku xidhan tahay dakhli-gaaga. Waxanu dakhli-gaaga u xisaabinaa sidii ood qaadato qadarka buuxa ee deynta ardayda eed heli karayso, xataa haddii aanad sida dhabta qaadanin haba-yaraate. Waanu iska dhaafnaa lacagtaasi £10 ee ugu horeeya toddobaadkii. Ardayda ku qaata deeq lacageed koorasyo dibloom kal-kaaliye-nimo ama umuliso-nimo ma heli karayaan deyn arday sidaasi darteed uma tirino wax dakhli deyn ah.

Ardayda barta kal-kaalin-nimada aan ahayn diblooma si la mid ah habka aanu guud ahaan u-samayno ardayda ayaanu u- tirinaa wixii deeq iyo qadar dakhli deyn buuxa ah.

Qawaniinta lagu xisaabiyo Dheefta Guriyeynta ardaydu waxa weeye mid dhib badan. Haddii aad hayso wax suaalo ah, waxad had iyo jeer waydiisan karaysaa talo-siin kawnsalka ku yaal deegaan-kaaga.

Sidee ayaan u codsadaa dheef?

Waxad ka buuxsataa oo keliya foomka codsiga Dheefta Guriyeynta iyo/ama Cashuurta Kawnsalka xafiiska guriyeynta ee ku yaal deegaan-kaaga.

Waa maxay caddaynta layga baahan-yahay in aan idin keeno?

Waxad soo raacisaa foom-kaaga ood usoo buuxisay si dhamaystiran, wax-yaabaha soo socda si loo qiimeeyo codsi-gaaga.

- Kobbi qiimayn maaliyadeed aad leedahay
- Caddayn dhammaan dakhliga iyo kaydka kale eed haysato
- Faah-faahin buuxda oo ku saabsan kooras-kaaga, ooy ku jiraan taariikhaa teeramka iyo sannadka aad ku jirto
- Caddayn kiradaada
- Caddayn aqoonsi-gaaga iyo Lambar Caymis Qaran

Foomka codsiga ayaa kuu sheegaya waxa aanu u baaha-nahay, laakiin haddii aanu u baahano macluumaad dheeraad ah waxanu kuu soo diri doonaa warqad aanu kaaga codsanayno.

Guri ayaan arday kale kula noolahay. Ma waxa weeye in aanu bixino Cashuur Kawnsal?

Maya, maaha sida caadiga in aydu bixisaan Cashuur Kawnsal. Haddii aad ku nooshay guri ay degan-yihiin arday qudhi, waxad codsan karaysaa in lagaa dhaafo Cashuurta Kawnsalka. Si aad taasi u samayso, qofkasta oo guriga ku jiraa waa in ay u gudbiyaan shahaadadahooda ardaynimada xafiiska Cashuurta Kawnsalka. Haddii aanu xafiiska Cashuurta Kawnsalku helin shahaadadaha qofkasta oo degan guriga, waxay soo saari doonaan biil Cashuur Kawnsal.

Waxan ku noolahay marin deganaansho. Miyaan bixinayaa Cashuur Kawnsal?

Maya, maaha sida caadiga ah in aad bixiso Cashuur Kawnsal waayo guriga waa laga cafiyey Cashuur

Waxan guri la deganahay dad kale oon arday ahayn. Ma waxa weeye in aan Cashuur Kawnsal bixiyo?

Qawaaniinta cidda xilku ka saaran-yahay bixinta Cashuurta Kawnsalku meeshii ay ku wada nool yihiin arday waqti buuxa wax-barta iyo qaar aan ahayn arday way dhib badan tahay. Waxa loo baahan-yahay duruuf kasta in iskeed loo eego. Wixii talo-siin dheeraad ah waxad kala xidhiidhi karaysaa Qaybta Cashuurta Kawnsalka ee Kawnsalka deegaan-kaaga.

Haddii dadka aan ardayda ahayni ay qaataan Taakulayn Dakhli ama Gunno Shaq-raadis (dakhli ku salaysan ama Lacag Hawl-gab ah, bedelka Cashuurta Kawnsalka ugu saraysa (Lacag-dhimidda Waayeelka Labaad) ayaa lagu dabiqi karayaa. Marka la codsado, taasi waxa la siin doona 100% ka dibna hoos ugu dhimaysa xilka saaran ibir.

Halkee ayaan ka heli karayaa nasteexo dheeraad ah?

Haddii aad doonayso cawimaad dheeraad ah ama nasteexo, kala xidhiidh Kawnsalka ku yaal deegaan-kaaga ama Jaamicad-daada ama Kulliyad-daada. Waxa laga yaabaa in ay leeyihiin xarun nasteexo taasi ood ka heli karayso caawimo. Haddii kale waxad la xidhiidhi karaysaa xafiiska nasteexada muwaadiniinta ama Adeega Xuquuqda Daryeelka. Waxad ka helaysaa tafaasiisha buuga tilifoonka deegaan-kaaga.

Qaabab kale

Waxad ku heli karaysaa macluumaadka ku yaal buugan-yar far waaweyn, far Indhoole, werin cajaladeed iyo luuqado kale. Wixii macluumaad dheeraad ah waxad booqataa websaytka www.benefit-leaflets.org.